

# Imaanshaha Wargelinta Waalidiinta

Haddii ilmahaagu nus (gelin) maalmeed maqnaado todobaadkii (oo ah hal cashar oo laga maqanaaday) ilmahaagu wuxuu imaanshihiisu noqon doonaa 90%. Ilmo kasta oo imaanshihiisu ka hooseeyo 90% waxay dawladdu u aqoonsan tahay inuu yahay ilmo maqnaanshihiisu joogto yahay.

Haddii uu imaanshaha ilmahaagu ka hooseeyo 95% imaanshaha ilmaahaagu wuxuu ahaan doonaa mid isha lagu hayo waxaana laga yaabaa in lagugu martiqaado kulan (Attendance Panel Meeting) oo aad la yeelato madaxa Qeybta Imaanshaha, xubin ka tirsan madaxda sare ee dugsiya, Kaaliyaha caafimaadka dugsiya iyo Hawlwadeenka Qeybta Taageerida Qoyska (Family Support Worker) si loo xaqiijiyo imaanshaha ilmahaagu inuu fiicnaado

## Maqnaansho aan la ogolaan:

Waalidiinta looma ogola in ay carruurtooda dugsiya keeni waayaan sababaha soo socda awoodood: dhalashooyinka qoyska, bixitaanka /socdaalka wakhtiga dugsiya furan yahay, booqashada ehelka qoyska, haynta xubnaha kale ee ka tirsan qoyska, daawashooyinka tartanka ciyaaraha, dukaansiga iwm. Dhammaan sababahaasi oo idil waxay yihiin maqnaansho aan la ogolaan waxaana lagu muujin doonaa xarfahan **O, U ama G**. Wax yar oo maqnaansho ah oo aan la ogolaan ayaa loo baahan yahay ka hor inta aan la soo dirin digniin ganaax xadidan (**fixed penalty warning notice**). Maqnaanshaha joogtada ah ee aan la ogolaan kadib markii lagu soo diray digniinta, waxay aad ugu dhowdahay in ay ku dhaxaxsiiso ganaax lacageed oo dhan **£60**. Tani waxay u kordhi kartaa **£120** haddii aan lagu bixin 21 maalmood gudahooda.

**Hal maalin waxaa la xaadiriya labo mar (subax/Galab) = 2 maqnaansho oo aan la ogolaan**

**Imaanshaha aad u fiicani = ilmo farxad, kalsooni qaba oo awoodi kara inuu gaadho kartidiisa buuxda!**

Nooca	Imaanshaha	Micnaheedu waa maxay?
<b>Cagaar/doogo</b>	98% - 100%	Imaansho aad u fiican
<b>Iiin</b>	97.9% - 95%	Imaansho u baahan in la fiicneeyo
<b>Casaan/guduud</b>	Ka hooseeya 95%	Imaansho walaac leh iyo il-ku-heyn

## Maqnaanshaha la ogolaaday

Haddii ilmahaagu jiro ku maqnaado ama uu ay jirto sabab garowski leh (legitimate reason) oo uu uga maqnaado dugsiya waanu ogolaani doonaa maqnaanshahaasi marka uu waalidku/Daryeeluhu soo war-geliyo dugsiya keeni karna cadeyn caafimaad oo khuseysa maqnaanshaha marka laga codsado. Fadlan dugsiya ka soo wac **0161 226 2066** inta ka horeysa 9.30 subaxnimo maalin kasta oo ilmahaagu maqnaan doono.

## Maxay yihiin Maqnaanshaha la ogolaan karaa:

Haddii ilmahaagu uu jiran yahay, waxaan ku muujin doonaa calaamadda **I (jiro)**. Jiradda soo noq-noqota waxay u baahan tahay cadeyn caafimaad sida xaashida ballanta/warqadda Isbitaalka/xaashida dawo-qorista (medical evidence. i.e. Appointment cards/ Hospital letters/a copy of a medical prescription). Maqnaanshaha cadeyn caafimaad awgeed, waxaa lagu muujin doonaa xarfafka **M** marka la keeno xaashida ballanta/dawo-qorista, laakiin markii ay surto-gal tahay in la sameysto ballamaha wakhti ka baxsan saacadaha dugsiya.